



Ilaha Bulshada La Heli Karo Si Loola Tacaalo Rabshadaha Qoriga

Luulyo 22, 2022

Bulshada PPS ee qaaliga ah,

Xagaagan, rabshadaha hubaysan ee dhalinyarada ayaa ku kordhay guud ahaan dalka iyo magaalada Portland. Sannadkan 729 toogasho ayaa ka dhacay agagaarka Portland, taas oo saamaysay ardayda PPS, qoysaska, iyo dhammaan bulshooyinka dugsiyada. Tani waa mid naxdin ku ah dhammaan, waxaan idinku dhiirigelinaynaa in aad is taageertaan iyo cid kasta oo ay saamaysay rabshadaha hubaysan ee bulshadeena.

Ka-hortagga rabshadaha qoryaha dhallinyaradu waxay u baahan yihiin inay ahaato xeelad si heersare ah looga faa'iidayso karo oo bulshadu isku dubariday si ardayda loo ilaaliyo. Waxaan ognahay in xiriir wax ku ool ah, ka-qaybgal, iyo isuduwidda ka dhexeeya PPS, la-hawlgalayaasheenna, hay'adaha amniga dadweynaha, iyo bixiyeyaasha adeegga ay yihiin qaybo muhiim ah oo ka mid ah dadaalladayada ka hortagga.

Halkan waxaa ah dhowr waxyaalood oo aad ku samayn karto guriga si aad u taageerto ardaydaada:

- La wadaag macluumaadka dhabta ah ee ardayda, ka fogow xanta ama wararka aan sal iyo raadka lahayn.
- U ogolow ardayda inay la wadaagaan dareenkooda.
- Ka caawi ardayda inay horumariyaan xirfadaha adkeysiga.
- Waqti u qaado is-daryeelidda si aad u taageerto kuwa kugu xeeran.

Tan ugu muhiimsan, u sheeg ardaydu inay jiraan ilo gaar ah oo lagu taageerayo xubnaha bulshada ee ay saameeyeen rabshaduhu. Hoos waxaa ku yaal liiska agabka beesha ee dheeraadka ah.

[Xafiiska Ka Hortagga Rabshadaha](#) ee Magaalada Portland (adeegyo tarjumaad ayaa jira)

- **Barnaamijka Qoyska ee Rabshadaha ay Saameeyeen:** Adeegyada dhalinyarada iyo qoysaska ay saameeyeen rabshadaha bulshada
- **[Foomka Gudbinta Dhallinyarada](#)**
- **Qofka lala xariiro:** Hiag Brown, hbrown@portlandoic.org, iyo telefoon ahaan: (503)757-0250



- **Barnaamijka Wacyigelinta Heerka Waddada (SLO):** SLOs waxay la dhisaan cilaqaadka dhalinyarada iyo qoysaskooda si ay u yareeyaan iskahorimaadka iyo rabshadaha, si ay u taageeraan oo ay u caawiyaan helitaanka adeegyada bulshada iyo waxbarashada, bixinta adeegyada soo socda: lataliye, tababarayaal nolosha, ku dayashada wanaagsan, u doodayaasha, iyo dhexdhexaadiyeyaasha
- **Qofka lala xariro:** Mustafa Washington, Mustafa.washington@portlandoregon.gov, iyo telefoon ahaan 503-823-6521.

Degmada Multnomah waxay taageero caafimaadka dhimirka u haysaa kuwa ay saamaysay rabshadaha qoriga. (Adeeyo tarjumaad ayaa jira)

Degmada Multnomah [Qoysaska ay Saameeyeen Rabshadaha Qoriga Kooxda Ka Jawaabida Caafimaadka Dhaqanka](#) ayaa leh daaweeyayaasha Midabka (Afrikaan Amerikan, Afrikaan-Soo galooti iyo Laatiinka) si ay u taageeraan oo ay kor ugu qaadaan caafimaadka maskaxda xubnaha bulshada ee ay saameeyeen rabshaduhu. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan barnaamijkan iyo sida ay ku caawin karaan, fadlan kala xarir telefoonka 503.988.4888 ama iimaylka gvbhrt@mulco.us.

[PPS Sinnaanta Qowmiyada iyo Cadaalada Bulshada \(RESJ\) Wada-hawlgalayaasha Dhaqanka](#)

[Gaarka ah](#) ee bixiya Taageero:

[POIC](mailto:mentor@portlandoic.org) - mentor@portlandoic.org

[NAYA](mailto:richh@nayapdx.org) - richh@nayapdx.org

[IRCO](mailto:youth@irco.org) - youth@irco.org

[Latino Network](mailto:ximena@latnet.org) - ximena@latnet.org

Intaa waxaa dheer, PPS waxay sii waddaa inay bixiso [barnaamijyo tacliineed oo adag xagaaga iyo tayeynta](#) qoysaska iyo ardayda PPS.

Khadadka Nolosha (Adeegyada tarjumaada waa la heli karaa)

[Khadka Taageerada Sinnaanta Jinsiga](#) oo ay ka shaqeeyaan iyo dadka midabka leh.

503.575.3764

Xarunta Wicida Degmada Multnomah (adeegyada tarjumaada waa la heli karaa)

[Khadka qalalaasaha ee Multco](#) weli wuu furan yahay 24/7 wuxuuna leeyahay ikhtiyaarka jawaabta mobaylka sidoo kale.

503.988.4888



U caqli yeelo carruurta macluumaadka badbaadada hubka

Ururka ah [U Nogo Mid u Caqli Badan Carruurta](#) (macluumaad ku qoran Ingiriisi iyo Isbaanish)

Kaydinta hubka ee sugan waa qayb muhiim ah oo ka mid ah badbaadada guriga ee waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay u ilaaliyaan carruurta.

Mahadsanid,

Xafiiska Adeegyada Taageerada Ardayga